NATIONWIDE CHILDREN'S®
When your child needs a hospital, everything matters.

**Helping Hand™** *Health Education for Patients and Families*

# Echocardiogram leh Daawada Suuxinta ama Hurdeeysiinta Echocardiogram With Sedation or Anesthesia (Somali)

Echocardiogram, (**eh**-koh-**kar**-dee-oh-gram) oo inta badan loogu yeero echo, ayaa ah kumbuyuutarka altrasound ka ee wadnaha. Baaritaankaani xanuun ma leh. Hase yeeshee, inta badan caruurta kayar da'da 3 sano waxay dhibaato kuqabaan jiifida daganaanshaha leh muddo kufilan in sawiro wanaagsan laqaado. Sababtaas awgeed, dhakhtarkaagu wuxuu amray in la sameeyo **sawir-qaadis wadne ayadoo la hurdeysiinayo.** Taasi ayaa waxay ka macno tahay in ilmahaagu hurdi doono goorta baaristu socoto. Baaristu caadiyan waxay qaadataa 60 daqiiqadood. Qorshayso inaad ku qaadan doonto ilaa 3 ilaa 4 saacadood waaxda.

## Ka Hor Baaritaanka

- Kalkaalisada ayaa ku soo wici doonta si ay su'aalo kaaga waydiiso caafimaad ee cunugaaga.
- Kalkaalisada waxay kuu sheegi doontaa xiliga ay tahay inaad cunugaaga ka joojiso cuntada iyo cabitaanada, marka aad isbitaalka keeneyso iyo waqtiga ay tahay siinta daawo hurdeysiin.
- Ilmahaaga ha u oggolaan in uu cuno caano-caano, cabitaanada qufaca, ama nacnac adag. Haddii cunugaagu uu soo calaashaday xanjo, waxaa dib loo dhigi doonaa 2 saacadood hurdeysiinta goorta sawirka laqaadayo laga bilaabo wakhtiga uu xanjada tufay. Haddii xanjada la liqo, hurdeysiinta sawir qaadista ayaa dib loo dhigi doonaa illaa 8 saacadood laga bilaabo waqtiga la liqay.

****  Aad beey muhiim u tahay** inaad raacdo tilmaamaha ku saabsan cuntada, cabitaannada, iyo daawooyinka qaar ee baaritaanka ka horeeya. Hadaadan sidaa falin, waxaa dhici kartaa in ilmaahaagu aan la siinin daawada hurdeysiinta.

Kawac kalkaalisooyinka Ka hor Baarista Isbitaal Dhigista si aad su'aao uwaydiiso (614) 722-3850.


©2009, dib loo eegay 2024, Nationwide Children's Hospital
Sii socoto…

## Dawada

Caruurta qaar ayaa ubaahan kara daawo kaladuwan si ay useexdaan inta baaritaanka suuxdinta wata lagu samaynaayo. Dhakhtarka ayaa go'aaminaaya in cunuga lasuuxinaayo ama daawo hurdo lasiinaayo. Dhakhaatiirta iyo kalkaalisooyinka ayaa caruurta siiya suuxinta ubaahan lasocosho gaar ah. Mararka qaar caruurtaan waxaa lasiiyaa daaqo ay kuastaan kahor intaan daawada suuxdinta ee IV lasiin. Tani waxay kacaawinaysaa inay caafimaad qab ahaadaan.

Dhakhtarka suuxdinta ayaa markasta go'aaminaaya daawadu ugu haboon cunugaaga.

**Yaa ubaahan kara suuxin?**

- Bukaanada qaba xanuunada aan ladaawayn ee wadnaha.
- Dhamaan bukaanada wadnaha kajiran.
- Dhamaan bukaanada halka xalfaaf leh.
- Bukaanada aadka ubuuran (BMI kasii wayn 35).
- Carruurta ka weyn 3 sanno jir.
- Bukaanada qalalka ama saska qaba. Dadkaan waxaa kujira caruurta aan lasiin karin daawada IV kahor intaan daawada hurdada lasiin.
- Bukaanada qalabka baaritaanka laga galinaayo dhuunta.

## Maalinta Baaritaanka

- Marka lagaaro maalinta balanta, waxaad imaanaysaa xarunta Crossroads Registration si aad uxaadirto. waxaa lagaa codsanayaa inaad timaado **90 daqiiqo** kahor baaritnaaka sawireed wadnaha ee cunugaaga.
- Kadib markaad isdiiwaangaliso, khabiir dhanka tignolojiyada ama RN ga ayaa adiga iyo ilmahaaga kaa soo qaadi doona qolka sugitaanka oo ku geyn doona qolka qalliinka kahor (pre-op).
- Waxaa lagu weydiinayaa inaad saxiixdo foomka ogolaanshaha in cunuga daawada hurada lasiiyo. Kadibna kalkaalisada ayaa cunugaaga kucelinaysa qolka baaritaanka si loobaaro. Waxa lagu weydiin doonaa inaad ku sugtid cunuga qolka sugitaanka.
- Kadib marka baaritaanka ladhameeyo, cunugaaga waxaa lasiinayaa waqti uu kusoo tooso asagoo lagaynaayo qolka baaritaanka kadib. Waxaa lagugu soo celin doonaa qolkan si aad u aragto.

## Sida Loo Qabto Baaritaanka

- Haday qasab noqoto in cunugaaga daawada laga siiyo xididka (IV), cirbada IV ayaa markaas lagalinayaa. Kalkaalisada ayaa kuusharxaysa dookhyada si gacan looga gaysto in IV lagu duro ayaga.
- Kalkaalisada ama dhakhtarka ayaa daawada siinayaa kana war heenaya xaalada cunugaaga intii kagam'aayo. Kalkaaliso ayaa joogi doonta si ay ula socoto iyaga inta lagu jiro baaritaanka oo idil.
- Qaybta taqasususka wadnaha ayaa samaynaysa baaritaanka. Kadib marka uu baaritaanku dhamaado, ilmahaaga si dhow ayaa isha loogu hayn doonaa ilaa ay ka soo toosaan. Arintaan ayaa qaadan karta kudhawaad saacad.
- Kadib marka cunugaagu soobaraarugo, waxaa lasiinayaa biyo nadiif ah. Hadii ay awoodaan in ay biyaha soo matagin, waxaa lasiin karaa xogaa buskud ah. Waxaan sii wadaynaa inaan xaaladooda si dhaw ulasocono ilaa isbitaalka laga saarayo.

## Kadib Baaritaanka

- Cirbada IV waa laga saarayaa marka baaritaanku dhamaado.
- Marka gurigga lageeyo, cunugaagu waxa uu cuni karaa ama cabi karaa cuntooyinkooda caadiga ahaa. Haduu gaaray da' uu socdo, waxaa laga yabaa iney socodka la dhidhici karaan inta daawada jirkooda kujirto. Sababtaan awgeed, waxaan soojeedinaynaa inaad lasocoto ayaga markeey jaranjarooyinka iyo meelaha adag marayaan.
- Cunugaaga ayaa xanaaq badan lahaan kara xiliga galabkii maalinta baaritaanka waxaana suuragal ah inuu hurdo dheeri ah ubaahdo galabkaas. Subaxda xigta ee baaritaanka ka dib, waa in aysan jirin wax saameyn ah oo ka yimaada daawada loo isticmaalay hurdeeysiinta.

> Hadaad marhoraba balan xarun caafimaad kaqabsatay kadib baaritaanka cunugaaga, dhakhtarka qalabka wadnaha ayaa kuusharaxaaya natiijada kasoo baxday baaritaanka sanbabada. Hadaadan lahayn wax balan ah, waxaa natiijada laguusoo dirayaa maalin kale.

- Ka wac Xarunta Wadnaha (614) 722-2530 haddii aad u baahan tahay inaad baajiso ama dib u dhigto ballan.